



HIGHLAND PARK SENIOR HIGH SCHOOL NEWSLETTER

International Baccalaureate World School

9-ka Oktoobar, 2020

Kulanka Waalidka iyo Macallimiinta

Kulankii waalidka iyo macallimiinta sannadkan waxaa la qabanayaa laba maalmood. **Arbacada, 28-ka Oktoobar, 4:00-ta ilaa 6:00-da iyo Khamiista 29-ka Oktoobar, 6:00-da ilaa 8:00-da** fiidnimo. Mid ka mid ah imow. Kulanka hawada online ayuu noqonayaa. Kulanka macallin kasta 5 daqiiqo ayaa loogu talagalayaa. Tafaasiisha silda loo dhiganayo ballanta gadaal baa la idiinka soo sheegi doonaa. Waxaa lagu dhiirri gelin inay carruurtaadu kula soo galaan.

Macluumaadka Imtixaanka IB ee Fasallada 11 iyo 12

Dugsida Sare ee Highland Park wuxuu ka mid yahay **Hay'adda Caalamiga ah ee Shahaadada Baccalaureatka**. Ardayda ku jirta fasallada 11-aad iyo 12-aad waxay u fariisanayaan **Imtixaanka IB-ga ee Maayo, 2021**.

Macluumaadka Is-Diiwaangelinta:

Isdiiwaangelinta Imtixaanka Shahaadada Caalamiga ah ee IB ee bisha Maayo 2021 waxay billaabnaysaa **12-ka Oktoobar ilaa 30-ka Oktoobar, 2020**. Ardaydu marka hore macallimiintooda ayay kala hadleen 5-ta ilaa 9-ka Oktoobar. Waxay si rasmi ah isaga diiwaangelinayaan halkan online [HPSH IB Registration form- May 2021](https://forms.gle/2E9mn7CBL9fuDoUH7). (<https://forms.gle/2E9mn7CBL9fuDoUH7>)

- **Ardaydu ha isku diiwaangeliyaan emailkooda iskuulka**
- **MACLUUMAAD/LIFAAQYO ayaa lagu soo diri doonaa Schoology iyo barta internetka Ikuulka Highland Park laga billaabo 12-ka Oktoobar, 2020!**
- Ardaydu waa inay fasallada 11 ama 12 ku jiraan kuna qornaadaan koorso imtixaanka IB lagu qaato si ay imtixaanka IB ugu fariistaan. Imtixaanka waxaa lagu qaataa heerarka Sare - Higher Level (HL) ama Heerka Caadiga ah – Standard Level (SL)
- Ardayda fasalka 11-aad waxay isku qori karaan heerka Standard Level (SL) keliya oo ku kooban 2 koorso. Ardayda fasalka 12-aad waxay qaadan karaan ilaa 6 imtixaan markii la fiiriyo sharciga Ururka Caalamiga ah ee International Baccalaureate Organization oo loo soo gaabiyo IBO.
- Wax lacag ah la iskama qaadayo Imtixaanka IB sannadkan. Maamulka sare ee Iskuulada ayaa ka bixinaya arday kasta oo raba imtixaanka.
- Ardayda is-diiwaangelisay haddii ayna qaadan Imtixaanka IB oo ay isku qoreen ama ayna dhammaystirin qiimaynta iskuulka lagu sameeyo maadadaas, deegaanka iskuuladu \$120 ayuu khasaari imtixaankiiba.

- Ardayda codsanaysa kaalmo gaar ah Imtixaanka IB waa inuu qofka waxbarashadooda si gaar ah u maareeya waa inuu la xiriir isku duwaha Shahaadada si loo billaabo tallaabooyinka caawinta. Warqadaha caddaynta oo idil waa in la keeno si loo tixgeliyo codsiga caawinta.

Ardaydaada waxaan ku martiqaadaynaa fursaddan qaaliga ah. Haddii aad wax su'aal ah oo ku saabsan Shahaadada IB-da ama imtixaanaadka qabto, fadlan kala soo xiriir Jason Schlukebier, Isku Duwaha Shahaadada IB, emailka jason.schlukiebier@spps.org

Xarunta Caafimaadka Ee Highland Park

Xarunta caafimaadka Highland Park wuxuu sii wadayaa daryeel ugu fidinayo ardayda xilligan waxbarashada durugsan lagu jiro sannadkan. Daryeelka waxaa ka mid ah caafimaadka jirka, maskaxda, nafaqada, iyo aqoonta. Qoysaka lacag kama qaadayno markay na soo booqdaan. Caymiska ayaa loo diri haddii ay suurto gal tahay. Dhammaan ardayda Highland Park iyo bulshada ag-deggan oo ay da'doodu ka wayntahay 11 sano xaq ayay u leeyihiin daryeelka caafimaadka. Shaqaalaha rugta caafimaadka iskuulka ayay joogayaan Talaadada iyo Arbacada 8:00-da ilaa 4:00-ta. Laakiin maalmaha Isniinta, Khamiista, iyo Jimcaha, waxaad nagu booqan kartaa hawada online adiga oo nagala soo xiriiri kara habka Caafimaadka Durugsan - Telehealth. Ma qaadayno baaritaanka COVID. Laakiin waan ka fiirinaynaa calaamaadka COVID qof kasta oo iridda ka soo gala. Hadday dadka na soo booqanaya u baahanyihiin baaritaanka COVID, waxaan u diraynaa meelaha la isku baaro. Telefoonka tooska ah ee rugta waa 651-690-7667; lambarka ballanta lagu qabto rugta/caafimaadka durugsan waa 651-412-8445 email - trpflum@mncare.org

Warbixinta Sawirrada Buugga Xasuusta iyo Sida Loo Codsan Karo

Xusuusta Buugga Sannadka:

Codso buugga sannadka [order your yearbook](#). Qiimaha ugu jaban (\$70 for a regular yearbook package) ka hor maalinta Halloween, Oktoobar 31st!

Sidoo kale, **halkan ku soo dir** sawirkaaga iskuulka [post your school picture](#) (fasallada idil) ka hor 16-ka Oktoobar!

Sawirro kale ku dar buugga sannadka adigoo adeegsanaya Balfour's Image Share App: download the app today to set up your own account. Markiiba 5 sawir ku dir. Isticmaal project #: 107040 Furaha sirta ah upload code: hpsh2021

Macluumaadkii ugu dambeeyay waxaad ka heli kartaa HPSH [Yearbook website page](#)

Link:-> <https://www.spps.org/domain/1173>

[Order a 2021 yearbook](#): Dalbo qiimaha hadda u fiican

[Picture Day is Yours to Take](#): Iska qaada oo soo dira sawirkiinna fasalada 9-12 ugu dambayn 16-ka Oktoobar

[Senior Sibling Photos](#): ku soo dira sawirrada walaalaha ardayda qalinjabinaysa ugu dambayn 16-ka Oktoobar

[First Weeks of School](#): tartanka sawirrada la qaaday toddobaadkii iskuulka la billaabay

[Place a Baby Ad](#): (sawirka xayaysiinta markaad yaraydeen waqti uu ku egyahay lama xadidin, qiimuhuna waa \$35)

Delaney Lumpkin (sawir lacag la'caan looga qaadayo ardayda qalinjabinaysa) delaney.lumpkin@gmail.com

Orodka Masaafada Dheer

Kooxda Gabdhaha Girls Cross Country ayaa ku guulaystay wareegga ay ka qaybqaateen. Gabadha Molly Moening ayaa qaadatay billadda tartanka gabdhaha. Kooxda wiilasha orodka masaafada dheer waxay noqdeen kaalinta labaada Iskuulka Central ka dib. Labada kooxoodba waxay ku rajo wayanyihiin ka qaybqaadashada tartanka lagu qaban doono Highland Nine Golf Course Talaadada, 13-ka Oktoobar. Hambalyo ayaan u gudbinaynaa Tababbare Moening iyo kaalmeeyeyaashiisa.



Ka Yaabsiga Ardayda Qalinjebinaysa

Ka Farxinta Lama Filaanka Ardayda Qalinjebinaysa! Mahadnaq ayaan u gudbinaynaa waalidka, shaqaalaha, ardayda iyo isxilqaamayaasha Hiway Federal Credit Union oo barnaamijkan ka dhigay mid wanaagsan oo nabagelyo lagu qaato. Halkan ka fiiri sawirrada: <https://photos.app.goo.gl/TqikJwnBUtfPa6ef7>

Kaalmo Waxbarasho (Tutoring)

Iskuulada St. Paul (SPPS) waxay ka furayaan Xarunta Kaalmada Aqoonta - Academic Support Center (ASC), iskuulka Washington Technology Isniinta, 12-ka Oktoobar. Ujeedada Xarunta waa in ardayda iyo qoysaska fasallada Pre-K-12 la siiyo caawin waxbarasho iyo dhiirrigelin inta lagu jiro waxbarashada durugsan. Xarumo kalena waa la furi doonaa haddii loo baahdo iyo haddii shaqaalo la helo!

Koox ka kooban kalkaaliyeyaal macallin, shaqaalaha SPPS, dad shaqada ka fariistay, shaqaale ku meel-gaar ah iyo bulsha-waynta, iyo isxilqaamayaal khibrad u leh macillnimada ayaa caawin doona cid kasta oo timaadda Xarunta Kaalmada Waxbarashada. Waxaa laga kaalmayn doonaa: xisaabta, akhriska, qoraalka, sayniska, cilmiga bulshada, luuqadaha, iyo teeknoloojiyada. Waxaa la idinka caawin Nidaamka Waxbarashada Durugsan ee 2.0 dhinaca waxbarashada iyo baahida dhinacyada ijtimaaca iyo dareenka. Xaruntu waxay idiin diyaarisay kaalmo waxbarasho oo dheeraad ah. Ma aha casharradii fasalka ee caadiga ahaa.

Iskuulka ayaa ardayda magacooda u gudbinaya xarunta ayaga u ke salaynaya baahida ardayda. Soo gudbintu waxay billaabatay 1-da Oktoobar. Qoysaskuna waxay magacyada soo gudin karaan laga billaabo 16-ka Oktoobar. Ardaydu waxay u baahanyihiin in la soo gudbiyo magacooda si loo kaalmeeyo. Xaruntu la iskama iman karo - "drop in."

Ardaydu waxay heli karaan 1 ilaa 4 saacadood maalintiiba, oo ku xiran sidii shaqaale lo helo. Qaybta Raashinka waxay bixinaysaa cunto caafimaad leh subaxdii iyo duhurkii. Gaadiidna waxaa lagu codsan karaa hab isdiiwaangelin ah. Laakiin waxaa dhici karta inuu gaadiidku ku mashquulsanyahay barnaamijyo kale (sida Essential Kids Care, meal delivery, hybrid sites) oo ay dhici karto inaan gaadiid la helin mar kasta.

Xarunta kaalmada waxbarashadu waxay raaci doontaa tilmaamaha gobolka ee ku aaddan iskuulada ay diyaarisay wasaaradda Caafimaadka. Waa inay ardayda iyo shaqaaluhu afka doboolaan, kala fogaadaan, gacmahana mar kasta dhaqdaan. Haddii uu arday ama shaqaale isku arko calaamadaha cudurka ama natiijadii cudurka lagu arko, ama qof COVID-19 qabo lagu arko, waa inay ballantooda dib u dhigtaan oo ayna imanin Xurunta ASC.

Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho, fadlan booqo spps.org/asc.

Shuruudda Qaanuunka CIPA

Qaanuunka Badbaadada Carruurta ee Interneetka - Children's Internet Protection Act (CIPA), waxay ka hadashaa nabadgelyada ardayda. Qaanuunku waxuu ka raba Iskuulada K-12 iyo maktabadaha inay interneetka ka ilaaliyaan carruuta waxa xun. Waa inay arday kasta baraan habka si xil kasnimo ah loola dhaqmo interneetka, ilaalinta waxa u gaarka ah, nabageliyoodada si ay u helaan kaalmada dawladda Federaalka ee ku aaddan interneetka. Iskuulka Highland wuxuu casharradan ku bixiyaa xilliga casharka English-ka inta lagu jiro bilaha Siteembar iyo Oktoobar. Wixii su'aalo ah la xiriira Alison Rahman, Library Media Specialist (alison.rahman@spps.org).

Jadwalka Casharrada oo Wax Laga Baddlay 12-ka ilaa 14-ka Oktoobar

Toddobaadka billaabanaya 12-ka Oktoobar wuu gaabanyahay. Iskuuladu waxay u xiranyihiin 15-ka iyo 16-ka Oktoobar shirkii Macallimiinta ee sannadlaha ahaa. Jadwalkan hoos ku xusan ayaad raaci doonaa. Ardayda Schoolgy ayaa lagu ogaysiiyay. Fadlan, carruurtaada xusuusi isbedelkan si ay casharrada xilliyada cusub u soo galaan.

Isniinta: Oktoobar 12

Period 1: 8:30-9:25

Period 2: 9:30-10:25

Period 3: 10:30-11:25

Talaadada: Oktoobar 13

Period 4: 10:00-10:55

Period 5: 11:00-11:55

Arbacada: Oktoobar 14

Period 6: 10:00-10:55

Period 7: 11:00-11:55

Xaadirinta Ardayda

Ardaydu iyaga ayaa isxaadirinaya maalin kasta inta ay waxbarashada ku jiraan. Hal mar keliya ayay arintan samaynayaan. Bogga hore ee shabakada degmada SPPS www.spps.org booqo si aad u fiirsato fiidiyaha tallaabooyinka si faahfaahsan kuu tusaya. Fadlan si fiican ilmahaaga ula fiirso tallaabooyinka. **Haddii uu ilmahaagu maqnaanayao, fadlan soo wac Iskuulka Highland 651-293-8940, farriinna ku duub qaybta isxaadirinta.** Haddii ayna ardaydu isxaadirinin maalin ay cashar qaateen, hal macallin keliya ha la xiriireen si uu hal mar u xadiriyo casharrada dhan. Ardayda dugsiga sare waxaa laga filayaa inay qaadi karaan mas'uuliyad ay isku xaadiriyaan. Fadlan, ilmahaaga u sheeg inuu samaysto hab xusuusiya isxaadirinta sida jadwal kalandaariyo oo kale.

Kaalmada Diyaarinta iPad-ka

Ardayda u baahan iPad cusub ama wax ka mida qalabka iPad-ka waa inay la xiriiraan Xafiiska Kaalmada Qoysaska SPPS familysupport@spps.org ama telefoonka 651-603-HELP (4357). Codsiiyo aad u badan ayay helaan markaa fadlan u dulqaado.

Macluumaad dheeraad ah oo SPPS Waxbarashada Durugsan waxaad ka haysaa www.spps.org/distancelearning. Ardaydu si ay u diyaarsadaan iPad-ka iyo waxa la hal maala ay u baahanyihiin casharrada, waa inay raacaan **10-ka qodob ee “waan samayn karaa – I Can”** oo laga helo Schoology.

Si aad kaalmo qalabka teknoolojiga u heshaan, fadlan la xiriira Maareeyaha iPad-ka: erik.peterson@spps.org

- Tilmaamaha iPad-ka: 10-ka “waan samayn karaa – I can”: https://docs.google.com/document/d/e/2PACX-1vT_omK6zY86BryFEppoZmOi2dRznY-ojJPhP66RzbaL9HSvJOiQgVoawybj2ilkkiVnfX1lpc1B6Qx7/pub
- Tilmaamaha Schoology ee Ardayda: <https://support.schoology.com/hc/en-us/categories/200077723-General#section-header>
- Waxbarashada Durugsan Ee SPPS: <http://www.spps.org/distancelearning>
- Tigidhka ay Qoyska/Ardaydu ku Raadsadaan Caawinta Teknoolojiga: familysupport@spps.org
- Telefoonka Xafiiska Caawinta Qoyska/Ardayda: 651-603-HELP (4357)

Ururka Waalidka Macallimiinta iyo Ardayda

Ku soo dhowaada Ururka Waalidka Macallimiinta iyo Ardayda ee Dugsida Sare ee Highland Park (PTSA).

Diyaar baan u nahay inaad waajahno caqabadaha na hor yaalla sannad dugsiyeedka 2020-2021!

Haddaad tahay waalid/mas'uul ka ah arday dhigata Iskuulka Highland Park Senior High (HPSH) ama aad arday ka tahay HPSH waxaad ka tirsantahay jaaliyad taageersan ardayda iyo macallimiinta. Bulshadeennu way sii xoogaysan marka aan ka gudubno caqabadaha waxbarashada durugsan.

Qalabka korantada ku shaqeyaa ayaan sidii hore si ka badan ugu xiriiraynaa; kulammo ayaan ku qaadanaynaa iyo weliba xiriirka bulshada. Fadlan, la xiriir PTSA adiga oo adeegsanaya mid ka mid ah hababkan lagu xiriiro:

Ku biir email-ka kooxda PTSA: <http://goo.gl/forms/Z60kDF5vIrHMNxCV2>

Twitter naga dhex hel: @scotspts

Nagu soo biir kooxda saaxibada iyo qoysaska Facebook at Highland Park Senior High Families and Friends: <https://www.facebook.com/groups/668231483252731/>

MABAADI'DA PTSA

Ardayda iyo macallimiinta ayaan mar kasta xoogga saarnaa. Ururka **Highland Senior High School PTSA** wuxuu diiradda saaraa waxbarasho sarraysa, kobcin dheeraad ah iyo barnaamijyo waxbarasho oo horay u wada ardayda oo ku salaysan bulshadannada. Mabaadi'dan laba siyaabood baan ku xoojinnaa:

- Inaan ila caawimaad dhaqaale u helno ardayda, macallimiinta iyo fasallada oo xoojiya waxbarashada fasallada, barnaamijyada kale iyo qalabka waxbarashada; iyo,
- Midaynta jaaliyadda HPHS anaga oo dhisayna barnaamijyo, xaflado, abaalmarinno uu iskuulka oo idil ka qaybgalo.

SABABAHA AAD PTSA UGU BIIRI KARTO

- Ardaygaaga ayay u fiicantahay. Cilmi baaristu waxay tilmaamaysaa inay ardayda waalidkood ka qaybqaato iskuulkooda ay dhibco sare keenaan ayna yartahay inay mashaakil anshax xuma la yimaadaan.
- Waxaad helaysaa ilo kaa caawiya sida uu ardaygaagu guul uga gaari lahaa waxbarashada.
- Waxaad noqonaysaa qof "wax og." Kulan kasta oo uu yeesho Ururka Waalidka Macallimiinta iyo Ardayda ee Dugsiga Sare ee Highland Park waxaa qayb ka ah Maamulaha, Dr. Tucker iyo shaqaale kale.
- Waxaan nahay urur furfuran. Ku biiridda PTSA ma aha inaad kulan kasta ka qaybqaadato. Ka soo qaybgal haddii ay duruufaaadu kuu oggolaato. Haddii aad ku biirto emailka PTSA (HPSHpts@gmail.com), waxaad helaysaa warbixinta kulanka si aad u ogaataan waxa socda.
- Ka faa'iidayso Iskuulka Highland Park dadka ka tirsan. Ururka PTSA waa bab wanaagsan oo aad kula kulmi karto waalid kale, shaqaale, iyo macallimiin.
- Waa fursad aad wax ku badeli karto. Marka aad nala wadaagto fikradahaaga, dareenkaaga, iyo waxyaabaha aad la kulanto, bulsho awood leh ayaad Iskuulka HPSH ka dhigaysaa.
- Waan kuu baahannahay. Ururka PTSA wuxuu u adeegaa dhammaan ardayda Iskuulka HPSH. Kaalmadaada ayaan u baahannahay si aan ugu guulaysanno hawshan muhiimka ah.

Kulanka soo socda ee Ururka PTSA sannadkan waa 13-ka Oktoobar, 6:30 PM waxaana lagu qaban doonaa kombiyuutarka online. Magaca naanaysta ee Google Meet lagu soo galayo waa meet.google.com/see-fgci-wfe. Haddii aad dhib kala kulanto xiriirka (link) lagu soo diray, halkan kaa guuri oo ku dheji shabakada Google Chrome.

Qaybinta Raashinka

Laba siyaabood ayaa lagu heli karaa cunno sanduuq ku xiran:

- **Guryaha oo cuntada la geeyo:** Cunto ka kooban qureec, qado, iyo caano ayaa guriga laguugu keeni hal maalin toddobaadkiiba.
- **Iskuulka oo laga qaato:** Cunto ka kooban qureec, qado, iyo caano ayaa laga qaadan karaa 5 ka mid ah dugsiyada sare maalmaha Isniinta ilaa Jimcaha, 9:00-ka subaxnimo ilaa 3:00-da duhurnimo. Isdiiwaan gelin uma baahna.

Tafaasiisha waxaad ka heli kartaa spps.org/fallmeals luuqadaha Ingkiriis, Isbaanish, Hmong, Soomaali iyo Karen.

Sidoo kale, fadlan xusuuso inaad buuxiso arjiga [Application for Educational Benefits](#) haddii aadan horay u samayn. Arintan ma saamaynayso qiimaha cuntada xilligan, laakiin muhiim bay u tahay in dhaqaale fasallada waxbarashada loo helo.

Ilo Ay Waalidku Ka Faa'idaysan Karaan

Isxaadirinta - Attendance procedure: <https://www.spps.org/Page/40384>

Kaalmada - Schoology Support: <https://www.spps.org/Page/30107>

Caawinta - iPad Help: <https://www.spps.org/Page/38790>

Wabarashad Durugsan - Distance Learning Family Support: <https://www.spps.org/Page/38794>

Macluumaad Kale - Additional Information about Distance Learning: <https://www.spps.org/Page/39071>

Xiriirka La Taliyeyaasha Ardayda (Counselors)

La taliyeyaashu diyaar ayay u yihiin inay ardayda ka caawiyaan baahida dhinacyada bulshanimada iyo tan dareenka nafsiga ah. Su'aalaha ku saabsan jadwalka waxbarashadana way ka jawaabi karaan. Ballan ka qabso qofka ilmahaaga qaabilsan adiga oo raacaya jadwalka kalandaariyaha hoos ku qoran. La taliyaha ayaa kula wadaagi doona Google Meet link ballanta kulanka ka hor.

Jevita Baheriy, Fasalka 9-aad iyo Capitol Hill & CCRC

<https://calendly.com/jbaheriyhighland>

Jevita.Baheriy@spps.org

Jo Skaar, Fasalka 9-aad

<https://calendly.com/jskaarhighland>

Johanna.Skaar@spps.org

Megan Pankow, Fasalaada 10-aad ilaa 12-aad Magacyada Dambe ee Ka Billowda A-G

<https://calendly.com/megan-pankow>

Megan.Pankow@spps.org

Kim Ezzo, Fasalaada 10-aad ilaa 12-aad Magacyada Dambe ee Ka Billowda H-Q

<https://calendly.com/kimberly-esso>

Kimberly.Ezzo@spps.org

Kenneth Zimmerman, Fasalaada 10-aad ilaa 12-aad Magacyada Dambe ee Ka Billowda R-Z

<https://calendly.com/kenneth-zimmerman>

Kenneth.Zimmerman@spps.org

Fiirsashada Shaqada iyo Dhibcaha Ardayda

Aad bay muhiim u tahay inay ardayda iyo waalidku si joogto ah u fiiriyaan qaybtooda Schoology si ay fiirsadaan shaqada laga rabo, dhibcaha ay haystaan, natiijada imtixaanka, iwm. Rubucaan (Quarter-kan) dhakhso ayuu u socdaa. Sidaa daraaddeed, waa inay shaqadooda la socdaan, macallimiintoodana la xiriiraan haddii ay su'aalo qabaan.

DHACDOOYINKA SOO SOCDA

Oktoobar 13, 6:30pm-8:00pm

Kulanka Ururka Macallinka Waalidka Ardayda (Hawada Online)

Oktoobar 28, 4:00pm-6:00pm
Oktoobar 29, 6:00pm-8:00pm
Nofeembar 3
Nofeembar 13

Kulanka Waalidka Iyo Macallimiinta (Hawada Online)
Kulanka Waalidka Iyo Macallimiinta (Hawada Online)
Casharro toos ah ma jiiraan doorashooyinka dartood
Dhamaadka Rubuca 1-aad (End of 1st Quarter)

Taariikhaha Ugu Dambaysa Bixinta Dhibcaha Ee 3-Biloodlaha Ah

Quarter 1	13-ka Nofeembar
Quarter 2	28-ka Jannaayo
Quarter 3	1-da Abriil
Quarter 4	11-ka Yuuniyo